

Qaadashada Tallaalka COVID-19

Maarso 2021



Tallaalka wax lacag ah kuuguma fadhiyo Dowlada federaalka ayaa bixin doonta kharashka tallaalkaaga. Waa in aan lacag lagaa qaadin ama lagugu dalacin Bixiyahaaga sidoo kale waa inuusan kugu dalacin lacagta xafiis booqashada haddii aad u tagto kaliya inaad tallaalka qaadato.



Waxaa hadda la heli karaa tallaalo badan oo COVID-19 ah. Waxaad heli doontaa midkood tallaalada Moderna, Pfizer-BioNTech, ama Johnson & Johnson (J&J)/Janssen. Haddii qaadato midkood tallaalka Moderna ama Pfizer-BioNTech, waxaad u baahan doontaa inaad qaadato labo kuure oo ay u kala dhaxeeyso saddex ilaa iyo afar toddobaad; kuuraha labaad waa inay soo saartay isla shirkada kuuraha koowaad waana inaad ka qaadato isla goobta tallaalka kuurahaaga koowaad. Tallaalka Johnson & Johnson (J&J)/Janssen waxaa lagu bixiyaa hal kuure ahaan.



Dhammaan tallaalada la heli karo waa badqab aad ayayna waxtar u leeyihiin. Maamulka Cuntada iyo Daawada ee Mareykanka (U.S Food and Drug Administration, FDA) wuxuu u oggolaaday in tallaalada loo isticmaalo xaaladaha degdegga ah wuxuuna arkay in dhammaantood ay aad waxtar u leeyihiin iyaga oo aan lahayn wax walaac badqab oo daran. Khubarada madaxabanaan waxay ku raaceen in tallaalada ay badqab yihiin ayayna waxtar leeyihiin.



Tallaalada ayaa lagu bixin doonaa iyada oo la raacayo mudnaanta uu bixiyo gobalka. Maine waxay waqti xaadirkan mudnaanta siineysaa in tallaalka da' lagu qeybiyo waxayna hadda raaceysaa talada federaalka si mudnaanta loo siiyo macalimiinta iyo shaqaalaha dugsiyada, iyo shaqaalaha daryeelka carruurta. Waxay qaadan doontaa xoogaa waqti ah, balse inta ay Maine heleyso kuurayaal dheeraad ah, qof walba wuxuu awoodi doonaa in la tallaalo. Booqo www.maine.gov/covid19/vaccines/vaccination-sites ama ka wac Khadka Taleefonka Tallaalka Bulshada Ee Covid-19 Ee Maine lambarka 1-888-445-4111. (si aad u hesho adeegyada turjumaada, ku dhawaaq luuqadaada marka taleefonka la qabto. Dadka dhagaha la' iyo kuwa maqalka ku adag yahay waxay wici karaan 711 waxayna ka codsan karaan in lagu xiriiriyo 1-888-445-4111.)



Waxaad dareemi kartaa waxyeelooyin. Sida tallaalada joogtada ahba, waxaad yeelan kartaa gacan xanuun, qandho, madax xanuun, ama daal kadib marki aad tallaalka qaadatid. Kuwani waa calaamadaha in tallaalka uu shaqeenayo.



Badqab ahaw. Ka dib markaad tallaalka qaadato, xiro afaabkaaga, ka fogoow dadka kale lix fuud (labo mitir), oo iska ilaali isu-imaatinadda si aad u ilaaliso kuwa aan wali tallaalka qaadatin.

Si aad u codsato dukumiintigan oo qaab kale ah, wac (207) 287-5014. Haddii aad kamid tahay macaamiisha dhagaha la' ama maqalka ku adag yahay, fadlan wac 711 (Maine; Relay) ama imayl u dir ADA-Civilrights.dhhs@maine.gov

Tallaalo nooc ee ah ayaa haddadan la heli karaa?

Waxaa jira saddex tallaalo oo haddadan la heli karo:

- Pfizer-BioNTech
- Moderna
- Johnson & Johnson (J&J)/Janssen

Dhammaan tallaalada waxaa oggolaaday FDA in loo isticmaali karo xaaladaha degdegga ah. Tallaalo kale ayaa laga yaabaa in la helo goor dhaw.

Yay tahay inuu qaato tallaalka COVID-19?

In tallaalka la qaato ayaa ah habka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo inuu kugu dhaco COVID-19. Waa ikhtiyaarkaaga inaad tallaalka qaadata. Haddii aad go'aansato inaad qaadata, waa inaad u sheegto bixiyaha tallaalkaaga haddii:

- Aad horay u yeelatay falcelinta xasaasiyad oo daran
- Aad leedahay qandho
- Aad leedahay xanuun dhiig bax ama aad qaadata dhiig khafiifiyeyaal
- Uu difaaca jirkaaga liito ama aad qaadata daawo saameyn ku leh difaaca jirkaaga
- Aad uur leedahay, aad qorsheeneeyso inaad uur yeelato, ama aad naas nuujineyso
- Aad qaadatay tallaalo kale oo COVID-19 ah

Waa inaad qaadanin tallaalka haddii aad horay falcelin xasaasiyad daran ugu yeelatay kuure hore oo tallaalka COVID-19 ah ama wax kasta oo uu ka sameysan yahay tallaalka.

Waa inaad jirto ugu yaraan 16 sano si aad u hesho tallaalka Pfizer-BioNTech, iyo 18 sano si aad u hesho tallaalada Moderna ama Johnson & Johnson (J&J)/Janssen.

Maxaa ku jira tallaalka COVID-19?

Dhammaan saddexda tallaalo waxaa ku jira oo shaqeynaya midkood RNA (mRNA) ama DNA oo ay la socdaan dufan, cusbo, iyo sonkor si loo ilaaliyo qeybta waxtarka leh ee tallaalka oo gacan looga geysto inay si wanaagsan wax uga qabato jirka. Midkoodna tallaalada ma lahan fayraska COVID-19 oo nool, ama waxyaabaha wax ilaaliyo ama shey kale. Tallaalka kuguma ridi karo COVID.

Maxaa dhacaya ka dib marka qaato tallaalka?

Waxaad u baahan doontaa inaad sugto 15 ilaa iyo 30 daqiiqadood ka hor inta aadan ka tagin goobta tallaalka si bixiyaha tallaalkaaga uu kuu caawiyo haddii aad yeelato falcelinta xasaasiyadda ama waxyeelooyin kale. Inta aad sugeyso, waxaad furan kartaa v-safe si aad u soo wargeliso waxyeelooyin kasta oo lagu xasuusiyo kuurahaaga labaad: v-safe.cdc.gov.

Waa iska caadi in la yeesho waxyeelooyin hal ilaa iyo saddex maalmood ka dib marki tallaalka la qaato. Waxyeelooyinka ugu badan waa daal, muruq xanuun, meesha lagaa duray oo ku xanuunta, qandho, madax xanuun, xanuunka kala goysyada, qarqaryo, lallabo, ama matag. Haddii calaamadahaaga aysan ku bi'in saddex ilaa iyo afar maalmood gudahooda, la xiriir dhakhtarkaaga ama rugtaada caafimaadka. Adiga ama bixiyaha tallaalkaaga ayaa sidoo kale soo wargelin kara waxyeelooyinka Nidaamka Soo Wargelinta Xaaladaha Xun ee Ka Dhasha Tallaalka (Vaccine Adverse Event Reporting System (VAERS)): vaers.hhs.gov/reporevent.html.

Wac 911 haddii aad yeelato falcelinta xasaasiyad kadib markaad ka tagto rugta caafimaadka. Calaamadaha falcelinta xasaasiyadda waxaa kamid noqon kara neefsashada oo adkaata, bararka wajigaaga iyo cunahaaga, wadna garaac degdeg ah, nabaro xun oo ka soo yaaca jirkaaga oo dhan, wareer, iyo laciifnimo.

Haddii aad qaadata midkood tallaalka Pfizer ama Moderna, hubso inaad ballan u qabsato kuurahaaga labaad. Waxaad u baahan doontaa inaad ku soo noqoto saddex ilaa iyo afar toddobaad gudahooda si aad u qaadata kuurahaaga labaad.

Ka dib markaad tallaalka qaadata, sii wad inaad xirato afsaabkaaga, ka fogaow dadka kale lix fuud (labo mitir), oo iska ilaali shirarka si aad u ilaaliso kuwa aan wali tallaalka qaadanin. Waxay qaadan doontaa ilaa iyo labo toddobaad ka dib markaad si dhameystiran u qaadata tallaalka inaad yeelato difaac buuxa (labo toddobaad ka dib kuurahaaga labaad ee Pfizer ama Moderna, ama ka dib halkaaga kuure ee Johnson & Johnson (J&J)/Janssen)

Booqo www.maine.gov/covid19/vaccines si aad u hesho macluumaad dheerad ah.